An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

# Qawaaniinta Guriga IPAS

La cusboonaysiiyay Juun 2026

**د کور مقررات په پښتو ژبه هم شتون لري. د QR کوډ سکین کړئ یا یې آنلاین وګورئ.**

**قوانین خانه به زبان فارسی نیز در دسترس است. کد QR را اسکن کنید یا به‌صورت آنلاین مشاهده کنید .**

**القانون الداخلي متوفرأيضا باللغة العربية. امسح رمز الاستجابة السريعة أو ادخل إلى الموقع الإلكتروني.**

შინაგანაწესი ასევე ხელმისაწვდომია ქართულ ენაზეც. **დაასკანირეთ QR კოდი ან ეწვიეთ ვებგვერდს.**

**Правила внутрішнього розпорядку також доступні грузинською мовою. Відскануйте QR-код або перейдіть за посиланням онлайн.**

**Las Normas de la Casa también están disponibles en español. Escanee el código QR o consúltelas en línea.**

**یاساکانی ناخو بە زمانی کوردیش بەردەستن. کودی QT سکان بکە یان بچو سەر هێل.**

**Le règlement intérieur est également disponible en français. Scannez le code QR ou consultez-le en ligne.**

**Xeerarka Guriga sidoo kale waxay ku qoran yihiin af-Soomaali. Iskaan garee QR code-ka ama booqo bogga internetka si aad u akhrido.**

**گھر کے قواعد و ضوابط اردو زبان میں بھی دستیاب ہیں۔ کیو آر کوڈ اسکین کریں یا انہیں آن لائن دیکھیں۔**

**Rregullat e Shtëpisë janë gjithashtu të disponueshme në gjuhën shqipe. Skanoni kodin QR ose shikojini online.**

**As Regras da Casa também estão disponíveis em português. Escaneie o código QR ou acesse online.**

**আবাসন বিধিমালা বাংলাতেও উপলব্ধ রয়েছে। কিউআর (QR) কোড স্ক্যান করুন অথবা অনলাইনে প্রবেশ করুন।**

**Nội quy Nhà ở cũng được cung cấp bằng tiếng Việt. Vui lòng quét mã QR hoặc truy cập trực tuyến.**

Adeegga Dejinta iyo Hoyga ee Dadka Codsanaya Ilaalinta Caalamiga ah (IPAS)

# Xeerarka Hoyga ee IPAS

## La cusboonaysiiyay Juun 2026.

### Tusmada Mawduucyada


1 Hordhac ku Saabsan Xeerarka Hoyga ee IPAS ........ 3

2 Jebinta Xeerarka Hoyga ee IPAS ........ 3

3 Xeerarka ........ 5

3.1 Sharciga ........ 5

3.2 Dhaqan ........ 6

3.3 Caafimaadka iyo Badbaadada ........ 8

3.4 Magacaabista hoyga ........ 13

3.5 Carruur ........ 17

4 Habka Cabashada ........ 19

# 1 Hordhac ku Saabsan Xeerarka Hoyga ee IPAS

Adeegga Hoyga ee Ilaalinta Caalamiga ah (IPAS) wuxuu bixiyaa hoy iyo adeegyo la xiriira dadka codsanaya Ilaalinta Caalamiga ah. IPAS waa qayb ka tirsan Waaxda Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka. Xarumaha hoyga waxaa lagu maamulaa magaca IPAS shirkado heshiis kula jira IPAS.

Dukumeentigan wuxuu qeexayaa xeerarka ay tahay in la raaco marka lagu nool yahay hoyga uu bixiyo IPAS. Xeerarka guriga ee ku xusan dukumeentigan waxaa loo dejiyay si waafaqsan Qodobka 83 ee Sharciga Ilaalinta Caalamiga ah 2026 (halkan kadib waxaa lagu tilmaamayaa “Sharciga”). Sharcigan wuxuu dhaqan galay 12 Juun 2026, wuxuuna dejinayaa heerarka lagu qaabilo dadka codsanaya ilaalinta caalamiga ah inta laga go’aaminayo codsigooda. Inta aad degan tahay hoyga IPAS, waa inaad raacdaa xeerarka ku xusan dukumeentigan iyo kuwa ku qoran Sharciga.

Adigoo ku nool hoyga uu bixiyo IPAS, waxaad oggolaanaysaa inaad u hoggaansanto xeerarkan guriga.

# 2 Jebinta Xeerarka Hoyga ee IPAS

Marka ay dhacdo in degane uu jebiyo Xeerarka Hoyga ee IPAS, oo jebintaasi loo arko mid yar oo aan culusayn isla markaana aan qayb ka ahayn jebinno soo noqnoqda, Maamuluhu wuxuu arrinta u soo jeedin doonaa deganaha wuxuuna isku dayi doonaa in lagu xalliyo gudaha xarunta—ha ahaato digniin afka ah ama digniin qoraal ah.

Si kastaba ha ahaatee, haddii jebinta Xeerarka Gurigu ay tahay mid culus ama soo noqnoqota, maamulka xarunta waxaa looga baahan yahay inuu si toos ah IPAS ugu gudbiyo warbixin dhacdo. Si loo gudbiyo warbixinta dhacdada, maamulaha xaruntu wuxuu:

- wuxuu baarayaa jebinta;
- wuxuuna raadiyaa aragtida deganaha/deganaasha ku lug leh, haddii aysan khatar ahayn in sidaas la sameeyo;
- wuxuuna u dirayaa IPAS warbixin dhacdo.

Haddii ay jiraan wax welwel ama arrimo la xiriira carruurta (qof kasta oo ka yar 18 sano), xaruntu waxaa looga baahan yahay inay ku wargeliso labadaba Tusla iyo IPAS. Haddii jebinta sidoo kale ay noqoto mid jebinaysa sharciga Irish-ka ama ay keento khatar weyn oo

saameynaysa nidaamka iyo habsami u socodka xarunta, maamulaha xaruntu waxaa looga baahan yahay inuu ku wargeliyo An Garda Síochána (booliska Ireland).

Sida uu dhigayo Sharcigu, deganuhu waa inuu u hoggaansamaa Xeerarka Guriga. Haddii jebin culus ama jebinno soo noqnoqda ee Xeerarka Guriga ay dhacaan, Wasiirka Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka wuxuu yareyn karaa ama ka noqon karaa (Qodobka 86 ee Sharciga) ama dib u magacaabi karaa shuruudaha soo dhoweynta (Qodobka 76 ee Sharciga). Tani waxay ka dhigan tahay in haddii aad jebiso Xeerarka Guriga, laguu wareejin karo xarun kale oo IPAS ah, ama la dhimi karo ama lagaa qaadi karo shuruudaha soo dhoweynta, kuwaas oo ay ku jiraan hoygaaga, taageerooyinka kale ee la xiriira, iyo lacagta kharashka maalinlaha ah.

**U wareejin xarun kale oo IPAS ah**

Sida waafaqsan Qodobka 76 ee Sharciga, haddii la go'aamiyo in laguu wareejiyo xarun kale, IPAS waxay kuu soo qori doontaa warqad ay ku cad yihiin taariikhda wareejintaada iyo xarunta cusub ee IPAS. IPAS sidoo kale waxay nuqul ka mid ah warqaddan u diri doontaa maamulaha xarunta.

**Ka noqoshada shuruudaha soo dhoweynta**

Sida waafaqsan Qodobka 86 ee Sharciga, haddii degane uu si culus ama soo noqnoqda u jebiyo Xeerarka Guriga, Wasiirka Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka, iyadoo loo eegayo danaha ilaalinta nidaamka wanaagsan iyo maaraynta ammaan iyo waxtar leh ee xarumaha hoyga, wuxuu si degdeg ah oo aan ogeysiis hore lahayn uga noqon karaa deganaha shuruudaha soo dhoweynta. Tani waxay ka dhigan tahay in aadan sii heli doonin hoyga IPAS.

Marka go'aan la gaaro in la yareeyo ama laga noqdo shuruudaha soo dhoweynta, isla markaana deganaha aan mar dambe IPAS loo siin hoy, Wasiirku wuxuu qofka u qori doonaa warqad uu ku sharxayo sababaha go'aanka.

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka lagu dhimayo ama lagaga qaadayo adeegyada hoyga, waxaad codsan kartaa in IPAS dib u eegis ku sameyso go'aankaas. Sida waafaqsan Qodobka 89 ee Sharciga, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aankan.

IPAS waxay bixisaa adeegyada iyo xaaladaha soo-dhaweynta ee codsadayaasha magangelyada caalamiga ah (International Protection). Haddii laguu soo saaray go'aan kama dambays ah, IPAS waxay joojin kartaa adeegyada iyo xaaladaha soo-dhaweynta ee lagu siiyay.

# 3 Xeerarka

## 3.1 Sharciga

Waa inaad u hoggaansantaa Sharciga Irish-ka. Waa inaadan ku lug yeelan wax falal dambiyeed ah. Inta aad degan tahay hoyga IPAS, fal kasta oo dambiyeed oo ka dhaca gudaha dalka waxaa loo arki doonaa jebin culus oo ku saabsan Xeerarka Guriga. Tani waxay khuseysaa falal dambiyeed ka dhacay gudaha hoyga IPAS, iyo sidoo kale falal dambiyeed ka dhacay meel ka baxsan hoyga IPAS gudaha dalka.

Haddii qof jebiyo sharciga dambiyada, waxaa lagu wargelin doonaa An Garda Síochána (booliska Ireland). Maamulayaashu waxaa waajib ku ah inay dhammaan arrimaha dambiyada ku wargeliyaan An Garda Síochána, mana laha wax ikhtiyaar ah arrintan. Arrin kasta oo la xiriirta ilaalinta carruurta, maamulayaashu waxaa waajib ku ah inay ku wargeliyaan Tusla, Hay'adda Carruurta iyo Qoyska, mana laha wax ikhtiyaar ah arrintan.

Falalka dambiyeed ee halkan lagu xusay waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn, kuwa soo socda:

- rabshado, oo ay ku jirto rabshadda qoyska
- xatooyo
- burburin hanti (vandalism)
- isticmaalka, bixinta ama kaydinta daroogooyinka sharci darrada ah
- sakhraansanaan iyo dhaqan qas ah
- dhibaatayn galmo ama tacaddi galmo
- cunsuriyad, naceyb ka dhan ah dadka LGBTQ+ (homophobia), ama cabsi gelin nooc kasta ah
- si ula kac ah u sameynta hadallo been ah, xaasidnimo leh ama sumcad-dil ah
- khatar gelinta ama waxyeellaynta caafimaadka iyo badbaadada deganeyaasha kale ama shaqaalaha xarunta

Dhaqanka noocaas ah waa sharci darro sida uu dhigayo sharciga Irish-ka.

### 3.1.1 Shuruudaha 'Is-wargelin iyo Deganaansho'

Haddii aad hoos timaaddo shuruudaha 'is-wargelin iyo deganaansho' ee Qodobka 102 iyo 103 ee Sharciga Ilaalinta Caalamiga ah 2026, waa inaad ku noolaataa meesha uu Wasiirku kuu cayimay. Haddii meesha la cayimay ay tahay hoyga lagu siiyay inta Dawladdu go'aaminayso codsigaaga ilaalinta, markaa waa inaad halkaas ku noolaataa ilaa laga beddelo ama lagala noqdo shuruuddaas oo uu sameeyo sarkaal socdaalka (immigration officer).

Shuruudaha gaarka ah ee is-wargelinta iyo ciqaabaha ka dhalanaya haddii aan loo hoggaansamin waxay ku qoran yihiin warqadda laguu siiyay marka laguu qoondeeyay hoygaaga.

Haddii aadan la shaqayn shuruudahan, waxaad galayneysaa fal dambiyeed waxaana lagugu ciqaabi karaa sida ku xusan Qodobka 86 ee Sharciga Ilaalinta Caalamiga ah 2026. Tani waxay keeni kartaa in la yareeyo ama lagaa qaado shuruudaha maadiga ah ee soo dhoweynta ee aad heli lahayd. Haddii aadan u hoggaansamin shuruudaha is-wargelinta, ama aadan si sax ah isu heli karin hay'adaha awoodda leh sida la farayo, codsigaaga Ilaalinta Caalamiga ah waxaa si aan toos ahayn (implicitly) looga noqon karaa sida ku xusan Qodobka 71(f) ee Sharciga.

## 3.2 Dhaqan

### 3.2.1 Ixtiraam

Waa inaad u dhaqantaa si ixtiraam leh, isla markaana aad si ixtiraam leh ula dhaqantaa qof kasta oo aad la kulanto. Waa inaad sidoo kale ixtiraamtaa hantida ku jirta xarunta iyo hantida deganeyaasha kale. Waa inaadan samayn wax khatar gelin kara badbaadada ama nidaamka wanaagsan ee xaruntaada. Hoyga IPAS gudihiisa waxaad la kulmi doontaa dad badan oo aan ahayn kaliya kuwa ka shaqeeya ama ku nool xarunta, kuwaas oo ay ka mid yihiin IPAS, waaxyo iyo hay'ado kale oo dowladeed, NGO-yo, xubno ka tirsan bulshada, iyo booqdayaasha deganeyaasha. Dhammaan deganeyaasha waa inay si joogto ah u ixtiraamaan dhammaan dadkaas.

### 3.2.2 Dhaqan rabshad leh ama gardarro ah

Waxaa jira siyaasad adag oo ah in aan loo dulqaadan (zero tolerance) falalka rabshadda ama gardarrada ee ka dhaca hoyga IPAS. Waa inaadan ku dhaqmin si rabshad leh ama gardarro ah gudaha hoyga IPAS. Falalka rabshadda ee qofka lagu sameeyo, oo ay ku jiraan xubin qoyska ka tirsan, ama xayawaan, waxaa ka mid ah: dhirbaaxid, feerid, qabasho xoog ah,

laadid, ceejin, qaniinyo, gubid, mindiyeyn ama toogasho. Sidoo kale, ku dhaqanka rabshad ama gardarro waxaa ka mid ah: hanjabaad, qaylin, xannibaad albaab (adigoo taagan oo xiraya), adeegsiga cabbir jir ahaaneed si cabsi gelin ah, tuurid walxo, ama feerid darbiyada.

Waa inaadan ku dhaqmin dhaqan xaqirid ah, mid takoor ah, cunsuriyad ah ama naceyb ka dhan ah dadka LGBTQ+ (homophobic). Tani waxaa ka mid ah isticmaalka erayo cay ah ama samaynta kaftan ama hadallo gef ah.

Waa inaadan ku lug yeelan dhibaateyn ama cagajugleyn. Dhibaateyn ama cagajugleyn waa dhaqan soo noqnoqda oo lagu doonayo in dadka kale lagu dhibo, waxaana ka mid noqon kara xadgudub afka ah, hanjabaado, hadallo xaqirid ah, kaftan, hadallo laba macne leh (innuendo), ama jeesjees loo jeedinayo dadka kale.

### 3.2.3 Haysashada hub

Waa inaadan haysan ama kaydsan wax kasta oo sida caadiga ah loo isticmaalo hub ahaan, oo ay ku jiraan mindiyo, qoryo been-abuur ah (imitation firearms), seefaha xafladaha (ceremonial swords), iwm.

### 3.2.4 Sawaxan

Waa inaadan samayn sawaxan xad-dhaaf ah, gaar ahaan inta u dhexeysa 10-ka habeenimo iyo 8-da subaxnimo. Waa inaad tixgelisaa deganeyaasha kale iyo deriska, sidoo kalena aad xasuusnaataa in dhammaan deganeyaasha ay xaq u leeyihiin inay si degan oo xasilloon u isticmaalaan xarunta.

### 3.2.5 Sigaar cabid

Waa inaadan sigaar cabbin ama isticmaalin vape (sigaar elektaroonig ah) meel kasta oo ka tirsan gudaha xarunta. Waa inaadan daboolin qalabka ogaada qiiqa (smoke detectors), maadaama tani ay keeni karto khatar daran oo dab ah.

### 3.2.6 Khamriga iyo Daroogada Sharci-darrada ah

Waa inaadan cunin ama ku kaydin khamri ama daroogo sharci-darro ah gudaha xarunta. Dadka ku jira saameynta khamri, daroogo aan dhakhtar qorin ama walxo kale oo saameeya dhaqankooda looma oggolaan doono inay soo galaan ama joogaan xarunta.

## 3.3 Caafimaadka iyo Badbaadada

### 3.3.1 Tilmaamaha Maamulaha Xarunta

Waa inaadan samayn wax kasta oo carqaladeyn kara caafimaadka guud iyo badbaadada xarunta. Tani waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn, inaad qolkaaga ama hantidaada ku haysato waxyaabo saameyn kara badbaadada dabka ee xarunta ama keeni kara khatar caafimaad dadka.

Si loo ilaaliyo habsami u socodka, nidaamka wanaagsan iyo badbaadada xarunta iyo dadka ku jira, waa inaad raacdaa tilmaamaha maamulka xarunta iyo shaqaalaha xarunta ee la xiriira dhammaan arrimaha hoyga.

### 3.3.2 Kormeerka Qolalka

Maamulka xarunta waa inuu sameeyaa kormeer joogto ah oo lagu sameeyo dhammaan qolalka ku jira xarunta. Waa inaad la shaqaysaa kormeeradan. Waxaa laguu sheegi doonaa marka kormeeradu dhacayaan, kuwaas oo badanaa dhaca si joogto ah oo la saadaalin karo. Waxaa sidoo kale jiri kara baahi kormeer ka baxsan jadwalkan; xaaladahaas, ka dib saddex isku day oo aan lagu guulaysan in la arko qolkaaga, maamuluhu wuxuu ku siin karaa ogeysiis rasmi ah oo sheegaya in qolka la kormeeri doono taariikh iyo waqti cayiman. Maamuluhu wuxuu geli karaa qolalka si lama filaan ah (iyadoo aan hore loo ogeysiin) haddii uu rumaysan yahay in ay jirto khatar degdeg ah oo ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada.

Qolkaaga waxaa sidoo kale kormeeri kara:

- shaqaalaha Waaxda Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka, oo ay ku jiraan shaqaalaha IPAS, ama
- kormeerayaal kale oo ay magacaawdo Waaxdu.

Ujeeddada kormeerada ay sameyso IPAS ama kuwa loo sameeyo magaca IPAS waa in la hubiyo in dhammaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada la buuxiyay; in shirkadda bixisa hoygaaga ay fulinayso waajibaadkeeda heshiiska; iyo in aad helayso dhammaan adeegyada kale ee la xiriira ee lagama maarmaanka ah.

Kormeeradan ay sameyso IPAS ama kuwa lagu sameeyo magaca IPAS waa kuwo aan hore loo sii ogeysiin. Maamulaha xarunta iyo adigaba lama sheegi doono goorta kormeeradani

dhici doonaan. Haddii aadan goobta joogin, kormeerka waxaa laga yaabaa in la sameeyo adiga oo maqan.

### 3.3.3 Qolkaaga

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad qolkaaga mar walba ka dhigto mid nadiif ah, hagaagsan oo hawo leh. Waa inaad ku wargelisaa maamulka xarunta haddii ay dhibaato soo baxdo, sida qoyaan joogto ah, caaryo, ama cayayaan badan oo dhib keena.

Qalabka yar-yar ee korontada iyo adabtarada (adapters) waxay keeni karaan khatar dab. Dhammaan qalabka noocan ah waa in uu ansixiyaa maamulaha xarunta, kaas oo hubin doona inay buuxinayaan heerarka badbaadada ee loo baahan yahay.

Waa inaadan qolka ku haysan qalab koronto oo waaweyn sida qaboojiye (fridge) ama qaboojiye baraf (freezer). Haddii aadan hore u haysan gelitaanka qaboojiye, isla markaana aad u baahan tahay meel qaboojiye ah oo lagu kaydiyo dawooyin u baahan heerkul gaar ah ama caanaha naaska (breastmilk), fadlan la hadal maamulaha xarunta, kaas oo kuu heli doona xal. Xalkaasi wuxuu noqon karaa qaboojiye yar oo uu bixiyo xaruntu oo si ammaan ah qolka loogu isticmaali karo, ama in lagu siiyo gelitaan qaboojiye kale oo ku yaalla meel kale oo xarunta ah.

Waa inaadan qolkaaga ku haysan alaab guri (furniture) aanay bixinin xaruntu.

Haysashada alaabo aad u badan oo keena isku buuq ama xannibaad lama oggola.

Waa inaad qolkaaga ka ilaalisaa khataraha dabka. Tani waxaa ka mid ah in la ilaaliyo in meelaha laga galo iyo laga baxo ay furnaadaan, isla markaana aan lagu kaydin waxyaabo keeni kara khatar dab.

### 3.3.4 Cunto iyo Karinta

Waa inaadan ku kaydin, ku karin ama ku diyaarin cunto qolkaaga. Sidoo kale waa inaadan ku haysan qolkaaga qalabka karinta ama diyaarinta cuntada sida blender, toaster, kettle, microwave, slow cooker iwm.

### 3.3.5 Qashin

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad iska nadiifiso meel kasta oo aad isticmaasho gudaha xarunta, oo ay ku jirto inaad qashinka oo dhan ku riddo qashinka (bins) loogu talagalay iyo inaad masaxdo dusha sare ee meelaha.

### 3.3.6 Xayawaanka la dhaqdo

Waa inaadan ku hayn xarunta xayawaan ama nooc kasta oo xayawaan ah. Eeyaha caawinta ee si rasmi ah loo aqoonsaday, loo diiwaangeliyay loona xaqiijiyay waa la oggol yahay. Si kastaba ha ahaatee, waa in oggolaansho laga helo IPAS ka hor inta aan eey caawin ah la soo gelin xarunta, iyadoo la raacayo Siyaasadda IPAS ee Eeyaha Adeegga.

### 3.3.7 Gaadiidka iyo Gaadiidka Korontada ee Fudud

Baarkin baabuur ma aha adeeg uu bixiyo IPAS. Haddii xarun ay leedahay meel baarkin ah, maamulka iyo qaybinta baarkinka waxaa go'aamiya maamulka xarunta. Haddii aad baabuur ku haysato gudaha xarunta, waa inaad awood u yeelataa inaad caddeyso in:

- aad adigu leedahay;
- uu si buuxda u canshuuran yahay; iyo
- uu si buuxda u caymisan yahay.

Ku dallacidda ama ku kaydinta baaskiillada korontada (e-bikes), mootada korontada (e-scooters), sabuuradaha korontada (e-skateboards), baytariyadooda ama waxyaabo la mid ah gudaha dhismaha xarunta si adag ayaa loo mamnuucay. Qaar ka mid ah xarumaha ayaa laga yaabaa inay bixiyaan meel bannaanka ah oo lagu kaydiyo ama lagu dallaco; marka la bixiyo, taas waxaa go'aamiya maamulka xarunta mana aha adeeg lagu heli karo xarun kasta.

### 3.3.8 Booqdayaasha

Booqashadu guud ahaan waa la oggol yahay inta u dhexeysa 10-ka subaxnimo ilaa 1-da duhurnimo iyo 2-da duhurnimo ilaa 8-da fiidnimo. Maamulaha xarunta wuxuu xaddidi karaa saacadaha booqashada iyo guud ahaan tirada booqdayaasha mar kasta haddii uu u arko in ay jirto khatar la xiriirta caafimaadka iyo badbaadada.

Booqdayaasha waxaa loo oggolaan karaa inay galaan meelaha loogu talagalay booqdayaasha ama meelaha wadaagga ah (communal areas). Gelitaanka qolalka deganeyaasha ama meelaha gaarka ah ee lagu noolyahay waxaa laga yaabaa in la xaddido

ama si buuxda loo mamnuuco, iyadoo ku xiran qaabka xarunta iyo shuruudaha badbaadada ee xaruntaas. Deganeyaasha iyo booqdayaashuba waa inay raacaan dhammaan tilmaamaha uu bixiyo maamulka xarunta ee la xiriira gelitaanka booqdayaasha.

Maamulayaasha xarunta ama ilaalada ayaa sidoo kale diidi kara gelitaanka, xaddidi kara tirada booqdayaasha, ama ka codsan kara booqdayaasha inay baxaan haddii:

- ay jiraan khataro la xiriira caafimaadka iyo badbaadada ama amniga oo la ogaaday.
- booqdaha uu khatar ku yahay qof kasta oo ku sugan xarunta ama hantida xarunta ama hantida deganeyaasha.

Xaaladdan, maamulaha xarunta wuxuu IPAS iyo deganaha ku wargelin doonaa sababaha loo diiday gelitaanka noocaas ah. IPAS, iyo sidoo kale maamulka xarunta iyadoo oggolaansho ka helaya IPAS, waxay wax ka beddeli karaan saacadaha booqashada ee xarun gaar ah, muddada ay booqdayaashu ku sii jiri karaan xarunta, iyo tirada booqdayaasha ee deganuhu mar kasta yeelan karo.

Intaas waxaa dheer, waa in had iyo jeer la raaco kuwan soo socda:

- Booqdayaashu waa inay shaqaalaha u sheegaan qofka ay rabaan inay booqdaan, isla markaana buuxiyaan diiwaanka booqdayaasha.
- Deganeyaashu waa inay la kulmaan martidooda.
- Deganeyaashu waa inay hubiyaan in martidoodu ay ixtiraamto xuquuqda deganeyaasha kale.
- Booqdayaashu waa inay saxiixaan foom ay ku aqbalayaan inay raacayaan Xeerarka Guriga iyo siyaasadaha IPAS.
- Booqdayaashu waa inay saxiixaan foom ka tanaasulid (waiver) ah oo ku saabsan wax kasta oo khasaare ama dhaawac ah oo dhaca inta lagu jiro booqashada.
- Dhammaan carruurta booqanaysa waa inay la socdaan qof weyn, mana suurtagal ah in carruur aan deganayn xarunta ay ku sugnaadaan gudaha xarunta iyaga oo aan waalid ama mas’uul la joogin.

Inta aad booqdaha ku haysato xarunta, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso inay raacaan xeerarka, sidoo kalena waxaad masuul ka noqon kartaa wax kasta oo dhibaato ah oo ka dhasha dhaqankooda.

### 3.3.9 Badbaadada Dabka

Fadlan hubi inaad ka warqabto waddada ugu dhow ee ka bixitaanka degdegga ah ee dabka (fire evacuation route) ee qolkaaga. Faahfaahinta waddada aad ku baxsanayso waa inay ku dheggan tahay qolkaaga jiifka. Haddii aysan jirin, fadlan la xiriir maamulaha xarunta. Waxaa sidoo kale ku yaalla ogeysiisyo dab (fire notices) oo ku yaal darbiyada guud ahaan xarunta, kuwaas oo kaa caawinaya inaad fahanto waxa la sameeyo haddii dab dhaco ama haddii la sameeyo tababar dab (fire drill).

Waa inaad la shaqaysaa shaqaalaha xarunta haddii ay ka daadgureynayaan xarunta sababo la xiriira dab ama tababar dab (fire drill). Xaruntu waxay si joogto ah u qaban doontaa tababaro dab, si loo hubiyo inaad taqaan waddooyinka aad kaga baxsan karto iyo meesha aad isugu imaanayso haddii dab dhaco. Haddii dab ama tababar dab dhaco, qaylo-dhaanta (alarm) si joogto ah ayay u yeeri doontaa. Marka aad maqasho qaylo-dhaantaas, fadlan si degdeg ah uga bax dhismaha adigoo adeegsanaya albaabka ugu dhow, una gudub meesha la isugu yimaado (assembly point).

Waalidiinta iyo mas'uuliyiintu waa inay (haddii ay ammaan tahay in sidaas la sameeyo) hubiyaan inay carruurtooda la baxaan marka ay ka daadgureynayaan xarunta. Intaas waxaa dheer, waalidiinta iyo mas'uuliyiintu waa inay u sheegaan maamulka xarunta haddii carruurtooda aysan joogin goobta waqtigaas, tusaale ahaan haddii ay dugsiga joogaan.

Waa inaadan faragelin albaabbada dabka, waddooyinka degdegga ah ee bixitaanka (fire exits), ogeysiisyada dabka (fire notices), ama qalabka badbaadada dabka. Waa inaad mar walba ka dhigtaa waddooyinka bixitaanka dabka kuwo furan oo aan xannibnayn. Waa inaadan albaabbada dabka si kasta u fur-furnayn ama u xannibin inay xidhnaadaan (prop open). Waa inaadan faragelin qalabka badbaadada dabka, oo ay ku jiraan damiyeyaasha dabka (fire extinguishers), tuubooyinka biyaha dabka (fire hoses), ama qalabka qaylo-dhaanta dabka (fire alarm equipment).

Haddii aad aragto ama ogaato dab, fadlan kici barta ugu dhow ee qaylo-dhaanta dabka (fire alarm call point), kadibna si degdeg ah uga bax dhismaha. Ha isku dayin inaad adigu damiso ama la tacaasho dabka.

## 3.4 Magacaabista hoyga

Sida ku xusan Qodobka 76 ee Sharciga, Wasiirka Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka wuxuu magacaabi doonaa xarunta IPAS ay ku siinayso hoy. Waa inaad u hoggaansantaa tilmaamaha IPAS iyo maamulka xarunta ee la xiriira degitaanka iyo ka bixitaanka qolkaaga.Sababo la xiriira hawlgalka, IPAS waxaa laga yaabaa inay ku wareejiso meel kale oo ka duwan meesha aad hadda joogto. Gudaha xarunta dhexdeeda, waxaa laga yaabaa in lagu faro inaad ka guurto qol kale iyadoo la raacayo amarka IPAS ama maamulka xarunta. Waa inaad la shaqaysaa dhammaan wareejinta goobaha iyo wareejinta qolalka.

Haddii aad diido hoyga IPAS ee lagu siiyo sabab kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in loo tixgeliyo diidmo shuruudaha soo dhoweynta, waxaana laga yaabaa inaadan xaq u yeelan dalabyo kale oo hoy ah oo dambe. Kiiska kaliya ee lagu tixgelin karo codsiyada hoy meel gaar ah waa xaalado gaar ah oo la xiriira baahiyo caafimaad oo culus. Fadlan tixraac Habraaca IPAS ee Codsiyada Wareejinta Caafimaadka (IPAS Protocol for Medical Transfer Requests), haddii aad rabto inaad codsi gudbiso.

https://assets.gov.ie/static/documents/7027f7e8/IPAS_Medical_Transfer_Request_2026.pdf

Codsiyada ku saabsan hoy gaar ah oo IPAS ah, sida in qof keli ah lagu siiyo qol (single-room occupancy), waxaa kaliya lagu tixgelin karaa xaalado gaar ah oo aan caadi ahayn, marka la caddeeyo in ay si lama huraan ah u buuxinayso baahiyahaaga daryeel caafimaad. Fadlan tixraac Habraaca IPAS ee Codsiga Tixgelin Dheeraad ah ee Sababo Caafimaad (IPAS Protocol for Requesting Additional Consideration on Medical Grounds), haddii aad rabto inaad codsi gudbiso.

https://assets.gov.ie/static/documents/191e37d5/IPAS_Medical_Consideration_Request_2026.pdf

### 3.4.1 Ka guurid Xarunta Hoyga

Qofna xaq uma laha inuu ku noolaado xarun gaar ah. Waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad u wareegto xarun kale. Waxaa lagugu wargelin doonaa wareejin kasta ka hor inta aysan dhicin. Diidmada inaad la shaqayso wareejinta waa jebin Xeerarka Guriga. Ka maqnaanshaha Hoyga IPAS ee dadka leh shuruudaha ‘is-wargelin iyo deganaansho’ (report and reside).

Haddii codsigaaga uu ku hoos jiro nidaamka xuduudda ee magangelyada (asylum border procedure), waxaa waajib kugu ah sida ku xusan Qodobka 184 ee Sharciga inaad ku noolaato

xarun u gaar ah nidaamkan inta codsigaaga la baarayo. Waa inaad ku noolaataa xarunta isla markaana aad maalin kasta xaqiijisaa joogitaankaaga. Dadka ku jira Nidaamka Xuduudda ma heli doonaan xaqa ay uga faa'iideystaan fasaxyada IPAS ee la shaaciyo. Joogitaankaaga waxaa lagu xaqiijin doonaa hab elektaroonig ah ama habab kale oo la bixiyo. Maamulaha xarunta ayaa kuu sharxi kara arrintan. Haddii aad habeen ka maqnaaneyso xarunta sababo caafimaad dartood, waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ugu sheegtaa maamulaha xarunta. Haddii aad ku guuldareysato inaad is-wargeliso 3 maalmood oo isku xigta, waxaad jebinaysaa waajibaadkaaga is-wargelinta ee ku xusan Sharciga, waxaana arrintaas loo gudbin doonaa IPO.

Natiijo ahaan ka maqnaanshahaaga hoyga laguu qoondeeyay adigoon haysan oggolaansho, gelitaanka hoygaaga waa lagala noqon doonaa, waxaana IPO laga yaabaa inay go'aansato in codsigaaga loo tixgeliyo mid si aan toos ahayn (implicitly) looga noqday sida ku xusan Qodobka 71(f) ee Sharciga. IPAS wax talo ah ama ka-qaybgal ah kuma laha go'aankan.

### 3.4.2 Ka maqnaanshaha Hoyga IPAS ee deganeyaasha aan ku hoos jirin shuruudaha 'is-wargelin iyo deganaansho'

Sida waafaqsan Qodobka 76 ee Sharciga, hoyga lagu siinayo waxaa lagu bixiyaa iyadoo la fahamsan yahay inaad maalin kasta ku noolaan doonto xarunta hoyga ee laguu qoondeeyay. Waa mas'uuliyadda IPAS in ay hubiso in hoy la heli karo dhammaan dadka codsanaya ilaalinta caalamiga ah ee aan haysan awood dhaqaale oo ku filan, iyo in dhammaan sariiraha loo qoondeeyay si joogto ah loo isticmaalo. Joogitaanka xarumaha waxaa kormeera maamulayaasha xarunta iyo IPAS.

IPAS waxay maamulayaasha xarumaha ku wargelisaa xilliyada fasaxyada ee la oggol yahay. Xilliyadan fasaxa ah waxay u oggolaanayaan deganeyaasha inay maqnaadaan muddo cayiman (tani kuma khuseyso dadka ku hoos jira shuruudaha 'is-wargelin iyo deganaansho', eeg kor). Fadlan hubi inaad buuxiso foomka loo baahan yahay oo aad u gudbiso maamulaha xarunta haddii aad rabto inaad maqnaato inta lagu jiro waqtigan la oggol yahay.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in marka laga reebo xilliyada fasaxa ee la shaaciyay, maqnaanshaha la oggol yahay oo kaliya xaalado gaar ah oo aan caadi ahayn, isla markaana horay oggolaansho looga helay maamulaha xarunta.

Haddii adiga ama carruurtaadu aad qorshaynaysaan inaad ka maqnaataan xarunta hoyga, waa inaad horay u sii ogeysiisaa maamulaha xarunta maqnaanshahaaga qorsheysan. Waa

inaad buuxisaa foomka loo baahan yahay (Foomka Ogeysiiska Maqnaanshaha Hoyga) oo laga heli karo bixiyaha hoygaaga. Foomkan waa in kadib loo gudbiyaa maamulaha xarunta, kaas oo oggolaan doona ama diidi doona codsigaaga.

Maamulayaasha xarumaha IPAS waxay isticmaalaan nidaam xaqiijin ah si loo hubiyo maqnaanshaha deganeyaasha ee xarunta. Sida ku xusan Xeerarka Guriga, waxaa kugu waajib ah inaad la shaqeyso nidaamkan. Maqnaansho aan oggolaansho lahayn waxaa loo gudbin doonaa IPAS.

### 3.4.3 Maqnaansho aan oggolaansho lahayn

Haddii aad maqnaato xilli ka baxsan xilliyada fasaxa ee la oggol yahay, isla markaana aanad haysan oggolaansho sida lagu sharaxay 3.4.2, maqnaanshahaas waxaa loo tixgelin doonaa "maqnaansho aan oggolaansho lahayn" ujeeddooyinka 3.4.4 iyo 3.4.5.

### 3.4.4 Muddada Maqnaanshaha aan Oggolaansho Lahayn

Haddii maqnaansho aan oggolaansho lahayn uu ka bato muddada soo socota, waxaad jebinaysaa Xeerarka Guriga waxaana lagugu qaadi doonaa tallaabooyinka lagu qeexay 3.4.5.

- Maqnaansho aan oggolaansho lahayn oo socota 7 maalmood oo isku xigta
- Maqnaansho aan oggolaansho lahayn oo gaarta 10 maalmood gudaha muddo 4 toddobaad oo joogto ah

### 3.4.5 Ka saarista gelitaanka hoyga

Sida ku xusan Qodobka 86(3)(f) ee Sharciga, haddii aad maqnaato adigoon haysan oggolaansho, muddooyinka lagu sheegay 3.4.4, tallaabooyinka soo socda ayaa la qaadi karaa:

***<u>Dadka Codsanaya Ilaalinta Caalamiga ah</u>***

- Hoygaaga goobta aad ku sugan tahay waa lagala noqon doonaa. Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo hoy meel kale oo ka duwan, haddii hoy noocaas ah la heli karo.

Ama

- Shuruudaha soo dhoweynta waxaa lagala noqon doonaa sida waafaqsan Qodobka 86 ee Sharciga, waxaana lagaa saari doonaa gelitaanka hoyga IPAS.

Labada xaaladoodba, sariirtaada ku taalla xarunta hoyga ee aad hadda degan tahay waxaa loo qoondeyn doonaa codsade kale oo raadinaya Ilaalin Caalami ah (International Protection).

*Loogu talagalay dadka ku jira hoyga IPAS ee codsigooda go'aan laga gaaray.*

Ma jiro waajib sharci ah oo lagu siiyo hoy dadka deggan xarumaha IPAS ee uu **Wasiirka Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka** ka soo saaray go'aan kama dambays ah oo ku saabsan codsigooda. Haddii aad heshay go'aan noocaas ah laguna tixgeliyo inaad **"maqan tahay adigoon haysan oggolaansho"** xarunta hoyga ee aad degan tahay, hoygaaga waa lagaa kala noqon doonaa waxaana loo qoondeyn doonaa codsade kale oo raadinaya **Ilaalin Caalami ah (International Protection)**.

### 3.4.6 Maqnaanshuhu wuxuu saamayn ku yeelan karaa Gunnada Kharashaadka Maalinlaha ah (Daily Expenses Allowance).

Ka maqnaanshaha xaruntaada waxay saamayn ku yeelan kartaa in aad xaq u leedahay iyo in kale **Gunnada Kharashaadka Maalinlaha ah (Daily Expenses Allowance)**. Fadlan sidoo kale eeg **Xeerka 3.5.5** ee ku saabsan maqnaanshaha carruurta ee xarumaha hoyga.

### 3.4.7 Haddii aad si joogto ah uga guurayso xarunta hoyga.

Waa inaad ogeysiisaa maamulaha xarunta haddii aad si joogto ah uga guurayso xarunta.

### 3.4.8 Isbeddelka Cinwaanka ama Beddelidda Cinwaanka.

Haddii aad tahay qof deggan mid ka mid ah xarumaha IPAS oo aad beddesho cinwaankaaga, oo ay ku jirto in laguu wareejiyo xarun hoy oo kale, waa inaad warqad ku wargelisaa hay'adaha ay khusayso, oo ay ku jirto **Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah (International Protection Office - IPO)**, si aad ugu sheegto isbeddelkaas. Foomamkan waxaa laga heli karaa internetka (online) iyadoo loo marayo IPO cinwaanka soo socda:

https://www.ipo.gov.ie/en/ipo/pages/customerservicehomepage

Haddii aadan hay'adaha ay khusayso ku wargelin inaad beddeshay cinwaankaaga, waxaa dhici karta inaadan helin ogeysiisyo muhiim ah oo la xiriira codsigaaga. Taasina waxay keeni kartaa inaad seegto waqtiyada kama dambaysta ah ee lagu gudbinayo dukumeentiyada, racfaannada, iyo arrimo kale oo la xiriira codsigaaga. Sida ku cad Qodobka 65(2)(b) ee

Sharciga, waxaa mas'uuliyaddaada ah inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga oo aad u sheegto Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah (IPO).

### 3.4.9 Ka bixitaan iskaa ah (Independent Departure) ama Bixitaan madaxbannaan.

Haddii aad ka baxdo Ireland, waa inaad u sheegtaa Wasaaradda Caddaaladda, Arrimaha Gudaha iyo Socdaalka. Waa inaad bixisaa caddeyn muujinaysa bixitaankaaga (tusaale ahaan tigidhka duulista ama shaabadda dib-u-gelitaanka ee baasaboorka) adigoo u diraya: voluntaryreturns@justice.ie. Markaas kadib, Wasaaraddu waxay xireysaa faylkaaga. Haddii aadan sidaas samayn, waxaa dhici karta in lagugu soo rogo mamnuucid nololeed (lifetime ban) oo ah inaad gasho Ireland iyo Midowga Yurub (EU).

## 3.5 Carruur

### 3.5.1 Dugsi

Waa inaad hubisaa in ilmahaagu uu dhigto dugsi.

Ilmo kasta oo da'diisu u dhaxayso 6 ilaa 16 sano waa inuu dhigtaa dugsi ama si kale u helo waxbarasho, sida ku cad **Sharciga Waxbarashada (Daryeelka) ee 2000**. Carruurtu waa inay dhammaystaan ugu yaraan saddex sano oo waxbarashada dugsiga sare (post-primary/secondary) ka hor inta aysan ka tagin dugsiga. Inta badan carruurtu waxay bilaabaan dugsiga bisha Sebtembar ee ka dambaysa marka ay gaaraan da'da 4 ama 5 sano.

Marka ilmahaaga la diiwaangeliyo dugsiga, waa inuu yimaadaa maalin kasta. Waa inaad u sheegtaa dugsiga haddii ilmahaagu ka maqnaado dugsiga sabab la xiriirta jirro ama sababo kale.

### 3.5.2 Daryeel iyo Badbaado

Sida waalid ama mas'uul sharci ah, adiga ayaa ka mas'uul ah daryeelka iyo badbaadada carruurtaada.

Ireland gudaheeda, ilaa da'da 18 sano, qofka sharci ahaan waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay ilmo. Waa inaad hubisaa in carruurtaada uu daryeelo qof weyn oo ku habboon marka aadan ku sugnayn xarunta. Ireland gudaheeda, garaacid ama dharbaaxidda ilmaha ma oggola qof weyn, ha ahaato guriga ama dugsiga. Dhammaan noocyada ciqaabta jirka ee carruurta waa

ka mamnuuc sharci ahaan, sida ku cad Sharciga Carruurta Marka Hore (Children First Act 2015) iyo Sharciga Waxbarashada 1998.

Arrintan waxaa loo tixgelinayaa dembi, waxaana maamulayaasha xaruntu waajib ku ah inay dhacdooyinka noocan ah u gudbiyaan **An Garda Síochána** iyo **Tusla**, oo ah Hay'adda Carruurta iyo Qoyska.

### 3.5.3 Siyaasadda Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta (Badbaadinta Carruurta)

IPAS waxay leedahay siyaasad ilaalinta carruurta oo ka shaqaysa mid kasta oo ka mid ah xarumaheeda. IPAS waxay daabacday **Siyaasadda Ilaalinta Carruurta iyo Daryeelka (Child Protection Policy and Welfare Safeguarding)**. Xarun kasta waxay leedahay Siyaasaddeeda iyo Bayaankeeda Ilaalinta Carruurta (Child Safeguarding Policy and Statement), waxaana nuqul ka mid ah laga heli karaa shaqaalaha xarunta.

Sida ku cad shuruudaha siyaasaddan, waa inaad hubisaa in carruurta iyo dhallinyarada loola dhaqmo si ixtiraam leh. Waa inaad mar walba hubisaa in ay badbaado ku jiraan oo aad daryeesho guud ahaan wanaaggooda iyo xaaladdooda nololeed.

### 3.5.4 Ilaalinta iyo Kormeerka Carruurta ee Xarunta Hoyga

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay mas'uul ka yihiin carruurtooda mar walba. Waalidiinta iyo mas'uuliyiintu waa inay hubiyaan in carruurtooda si ku filan loo kormeero loona ilaaliyo inta ay ku nool yihiin hoyga IPAS.

Waa mas'uuliyadda waalidiinta iyo mas'uuliyiinta in ay hubiyaan in carruurtooda ay badbaado ku jiraan oo si habboon loo daryeelo. Haddii la rumaysto in ilmo uu khatar ku jiro, shaqaalaha xaruntu waxay waajib ku tahay inay raacaan **Siyaasadda Ilaalinta iyo** Daryeelka Carruurta ee IPAS iyo Hagaha Qaran ee Carruurta Marka Hore (Children First) ee Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta.

Shaqaalaha xaruntu ma daryeeli karaan carruurtaada. Fadlan samee qabanqaabo ku habboon oo ah daryeelka carruurta ama ilaalintooda haddii aadan ku sugnayn xarunta. Carruurta looma oggola in habeenkii loo daayo dadka kale ee degan xarunta, marka laga reebo xaalado gaar ah oo kaliya, iyadoo oggolaansho hore laga helo maamulka xarunta. Haddii aad ilmahaaga uga tagto qof kale oo weyn oo degan xarunta si kasta oo wakhti ah,

waa inaad buuxisaa foomka ku jira Lifaaqa 5 ee Siyaasadda Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta. Maamulaha xarunta ayaa ku siin kara foomkan.

Haddii waalidku ilmaha ka tago iyada oo aan la kormeerin, uu iska indho tiro xeerarka guriga, ama uu ilmaha geliyo khatar, shaqaalaha waxaa sharci ahaan waajib ku ah inay arrinta u soo gudbiyaan **Tusla** sida walaac ku saabsan ilaalinta iyo daryeelka carruurta. **Tusla** waa hay'adda gaarka ah ee Dawladda ee ka masuulka ah horumarinta wanaagga iyo natiijooyinka carruurta.

### 3.5.5 Habeen-joog (meel kale lagu hoydo)

Iyada oo qayb ka ah Siyaasadda Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta, waa inaad horay u sii ogeysiisaa maamulaha xarunta haddii ilmahaagu uu habeen ku hoyanayo meel kale oo aan ahayn xarunta. Waa inaad maamulaha siisaa magaca iyo cinwaanka qofka uu ilmahaagu la hoyanayo, iyo taariikhda aad filayso inuu ku soo laabto. Arrintan waa in lagu sameeyaa iyadoo la buuxinayo foomka ku jira Lifaaqa 5 ee Siyaasadda Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta – maamulaha xarunta ayaa ku siin kara foomkan. Haddii aadan sidaas samayn, ilmahaaga waxaa laga yaabaa in loo soo sheego inuu yahay qof maqan (missing person) waxaana lagu wargelin karaa Tusla iyo An Garda Síochána (Booliiska Ireland).

# 4 Habka Cabashada

Qaybtani waxay qeexaysaa Habka Cabashada ee IPAS. Haddii aad qabto cabasho la xiriirta hoygaaga, waa inaad raacdaa habkan si arrinta si degdeg ah oo hufan loogu xalliyo.

Xaalado gaar ah oo aan caadi ahayn, waxaad si toos ah cabasho ugu gudbin kartaa IPAS adigoon la hadlin maamulaha xaruntaada. Tani waa in lagu sameeyaa kaliya xaaladaha aad dareemayso in ay jirto khatar dhab ah oo ka dhalan karta la hadalka maamulaha xarunta, ama marka ay jirto eedayn ku saabsan xadgudub ama waxyeello loo geystay degane ay sameeyeen shaqaalaha xarunta. Waa inaad sharaxdaa sababta aad cabashada si toos ah ugu gudbineyso IPAS, waxaana laga yaabaa in IPAS ay oggolaato in cabashada la tixgeliyo iyada oo aan la raacin habraaca caadiga ah. Samaynta cabasho ma saamayn doonto codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

**Qarsoodi (Sir dhowrid)**

Dhammaan cabashooyinka waxaa loo maareyn doonaa si taxaddar leh oo xasaasi ah, isla markaana sida ugu macquulsan loo ilaalin doonaa sirtooda, waxaana ka shaqayn doona

shaqaalaha xarunta iyo IPAS. Si kastaba ha ahaatee, si loo baaro cabashada, waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay la tashadaan dad kale oo ku lug leh arrinta.

**Qof saddexaad oo ku matalaya (ama ku hadlaya magacaaga)**

Waxaad magacaabi kartaa qof kuu matala si uu ula hadlo IPAS adiga oo ku hadlaya magacaaga; qofkaas wuxuu noqon karaa saaxiib, xubin qoyska ka tirsan, qareen, ama shaqaale taageero. Haddii qof kale uu IPAS kula xiriiro isagoo ku matalaya, waa inuu keenaa oggolaansho qoran oo aad adigu saxiixday, taas oo caddeyneysa in Wasaaraddu ay la xiriiri karto isaga/iyada adiga oo ku matalaya. Markaad samaynayso cabashadaada, waxaad caawimaad ka dalban kartaa saaxiib, qaraabo, xubin ka tirsan koox taageero, ama qof kale oo aad rabto inuu ku caawiyo. Si kastaba ha ahaatee, IPAS iyo maamulka xaruntu waxay xaq u leeyihiin inay si toos ah adiga kula xiriiraan cabashadaada la xiriirta.

**Tallaabooyinka**

Habka Cabashada ee IPAS wuxuu ka kooban yahay afar tallaabo:

**Tallaabada 1: Si aan rasmi ahayn oo loo ogeysiiyo Maamulaha Xarunta**

Marka ugu horreysa ee aad la kulanto dhibaato la xiriirta hoygaaga ama adeegyada la xiriira ee laga bixiyo xaruntaada, waa inaad la hadashaa maamulaha xarunta si aad u siiso fursad uu arrinta si aan rasmi ahayn ugu xalliyo.

**Tallaabada 2: Si rasmi ah oo loo gudbiyo Maamulaha Xarunta**

Haddii aad si aan rasmi ahayn ula hadashay maamulaha xarunta oo aadan ku qanacsanayn natiijada, waxaad gudbin kartaa cabasho rasmi ah oo qoraal ah oo aad u dirayso maamulaha xarunta. Maamulahaagu wuxuu haystaa 14 maalmood si uu qoraal ahaan ugaaga jawaabo cabashadaas. Cabashada waxaa lagu diri karaa iimayl ama gacanta ayaa lagu qori karaa.

Cabasho rasmi ah oo loo gudbiyo maamulaha xarunta waa inaad ku dartaa macluumaadka soo socda:

- Magacaaga
- Lambarkaaga TRN
- Faahfaahinta cabashada
- Faahfaahinta ku saabsan sida aad cabashada si aan rasmi ahayn ugu soo bandhigtay maamulaha xarunta, oo ay ku jiraan natiijooyin kasta oo la soo jeediyay ama tallaabooyin la qaaday.

**Tallaabada 3: Si rasmi ah oo loo gudbiyo IPAS**

Haddii aad u gudbisay cabasho rasmi ah maamulaha xarunta oo aadan ku qanacsanayn natiijada, ama haddii aysan ka jawaabin 14-ka maalmood gudahood, waxaad markaas cabashada si toos ah ugu gudbin kartaa IPAS adigoo iimayl ugu diraya ipasinbox@justice.ie ama boosto ahaan ugu diraya Kooxda Adeegyada Macmiilka ee IPAS, PO Box 11487, Dublin 2. Si loo baaro cabashadaada, IPAS waxay kaa codsan kartaa macluumaad dheeraad ah, sidoo kalena waxay la tashan kartaa maamulaha xaruntaada iyo dadka kale ee ku lug leh arrinta.

Cabasho loo gudbinayo IPAS waa inaad ku bixisaa macluumaadka soo socda:

- Magaca xaruntaada
- Magacaaga
- Lambarkaaga TRN
- Faahfaahinta cabashada
- Nuqullo ka mid ah cabashada rasmiga ah ee loo gudbiyay maamulka xarunta iyo jawaabtooda
    - Ama
- Faahfaahinta sababta aadan cabashada ugu gudbin maamulka xarunta.

**Tallaabada 4: Racfaan u gudbinta Ombudsman-ka ama Ombudsman-ka Carruurta**

Haddii aadan ku qanacsanayn natiijada cabashada aad u gudbisay IPAS, waxaad racfaan ka qaadan kartaa natiijadaas adigoo la xiriiraya Xafiiska Ombudsman-ka ama Xafiiska Ombudsman-ka Carruurta, sida ku habboon.

Xafiiska Ombudsman-ka:

Telefoon – 01 639 5600
Bogga internetka – www.ombudsman.ie

Xafiiska Ombudsman-ka Carruurta:

Telefoon – 01 865 6800

Bogga internetka – www.oco.ie

